IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad MUQDISHO 2 MAAJO 1980 L. —5

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba RUKUNKA : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 14 ee 17 Feberaayo 1980, Warshadda Hargaha Hargeysa. BOGGA 558

SHARCI L. 15 ee 25 Febraayo 1980, Hargaha iyo Saamaha » 565

SHARCI L. 16 ee 5 Abriil 1980, Meel marin heshiis » 572

LAW N. 16 5th Apr. 80, Instrument of Ratification » 573

SHARCI L. 17 ee 5 Abriil 1980, Meel marin heshiis » 574

LAW N. 17 5th Apr. 80, Instrument of Ratification » 575

SHARCI L. 18 ee 5 Abriil 1980, Meel marin heshiis » 576

LAW N. 18 5th Apr. 80, Instrument of Ratification » 577

SHARCI L. 19 ee 15 Abriil 1980 Meel marin Heshiis » 578

LAW N. 19 15th Apr. 80, Instrument of Ratification » 579

**QAYBTA** *KOOWAAD*

SHARCI L. 14 ee 17 Febraayo 1980 Wasaaradda

**MADAXWEYNAHA JDS**

ISAGOO ARKAY : Qodobbada 111 iyo 113 ee dastuurka J D.S.
ISAGOO ARKAY; Sharciga Wakaaladaha Iskood u Madax bannaan lam. 36 ee 22 Abriile 1972.

ISAGOO AQOONSADAY: Iay tahay lagama maarmaan in Warshadda Hargaha Hargeysa ee dhowaan dhismaheedu dhammaaday loo sameeyo sharci:-

ISAGOO ARKAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasaaradda.-

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga s oosocda:

QAYBTA 1AAD

HABKA GUUD EE DHISMAHA WARSHADDA

Qod.1aad

1) Warshadda Hargaha Hargeysa ayaa halkn lagu dhisay oo hdda ka dib la orandoono Warshadda Hargaha Hargeysa si loo gaaro horukac xagga farsamada Hargaha.-

2) Warshaddu waxay tahay mid madax bannaan ee jirid iyo shaqsiyad qaynnuuniya leh.-

3) Warshaddu waxay u hoggaansami doontaa Xeerkan iyo Xeerarka soo socda:-

a) Xeerka lam. 16 ee soo baxay 1dii Abriil 1970 iyo toosintii ka dambaysay ee Wakaaladaha madax bannaan faaqidaadda xisaabaha shirkadaha, sancada iyo ganacsiga iyo kuwa ku saabsan Mu'asaasaha Amaahda ee ay qayb ku leedahay Dawladdu.

b) Xeerka lam. 36 ee 22 Abriil 1972 ee Shaqaalaha Wakaaladaha Madax bannaan.

t) Xeerka lam. 58 ee 31 Lulyo 1972 ee lacagta wakaaladahamadax bannaan.

4) WARSHADDU WAXAY KA MID TAHAY KUWA DARAJADA (B)

### *QODOBKA 2AAD*

### XARUNTA IYO LAAMAHA WARSHADDA

Xarunta Warshaddu waxay ahaan doontaa Magaalada Hargeysa waxayna haddii loo baahdo, ku yeelan doontaa laamo Goballada iyo Degmooyinka J.D.S.-

### Qod. 3aad

### UJEEDDOOYINKA

UJEEDDOOYINKA WAA:

1) In Hargaha Dalka la gaarsiiyo Farsamada cusub si noocooda iyo qiimahadooba kor loog qaado:-

2) In suuqa dalka gudihiisa iyo kan dibadaba loo helo noocyada iyo midabyada hargo megdisan oo ku habboon lana tartami kara hargaha dalalka kale.

3) In Wrshaddu soo saarto hargaha megdisan ee loo yaqaan Pickled iwm.

4) In Warshaddu ayada oo la tixgelinayo qodobada kor ku qoran ay u madx bannaan tahay in ay hargaha iyo alaabta ka samaysan Hargaha ay ka ganacsan karto:

### QODOBKA 4AAD

### AWOODA

Warshaddu waxay leedahay, iyadoon ku xad gudbin Xeerkan, awood ay ku fulin karto ujeeddooyinka ku xusan qodobka saddexaad ee Sharcigan :

### QODOBKA 5AAD

### KORMEERKA GUUD

1) Kormeerka Guud ee Warshada waxaa yeelan doona Wasiirka Wasaaradda Warshadaha :-

2) Isagoo tixgelinaya qodobka 1aad (1) beddelaadda

Sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 22 Abriil 1972, Wasiirku wuxuu ku leeyahay Warshadda awood iyo mas'uuliyad buuxda xagga jaangooyada (Qorshaha) dhaqaalaha horumarinta iyo heshiisyada ganacsiga ee ay Warshaddu gelayso :-

## QAYBTA 2AAD

## QODOBKA 6AAD

## HABKA DHISMAHA WARSHADDA

1. Warshaddu waxay yeelan doontaa Maareeye Guud oo lagu magacaabo Dekreetada Madaxweynaha J.D.S. Isagoo tixgelinaya ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo talada Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasaaradda —

2. Warshaddu waxay ka koobnaan doontaa waaxyo, xubno, iyo laamo, waxaana awood u leedahay, hadday noqoto lagama maarmaan, inay laama ka furto Gobollada iyo Degmooyinka si ay hawsha loo xilsaaray u gudato;

## QODOBKA 7AAD

## XILKA MAAREEYAHA GUUD

1) Maareeyaha Guud waxaa loo xilsaaray, isagoo masilaya Warshadda fulinta ujeeddooyinka ku cad qodobka seddaxaad ee sharcigan, hawshiisuna waxay tahay :-

a) Inuu fuliyo Siyaasadda Dowladda Kacaanka Soomaaliyeed, Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

b) Inuu saxiixo heshiisyada ay Warshaddu dhinac ka tahay isagoo oggolaansho ka haysay Warshadda :

t ) Inuu masuul ka yahay habka maamulka shaqada Warshadda, wuxuuna awood u leeyahay inuu sameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan maamulka iyo cannaanta shaqaalaha Warshada

j ) Inuu mas'uul ka yahay maamulka lacagta Warshadda.

x) Inuu kudhaqaaqo wixii qaraar ah ee deg deg ah isagoo isla markaas ogeysiinaya Wasiirka Wasaarada War shadaha.

Kh) Inuu bixiyo wixii mar lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan.

d) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada Warshadda ee caadi ah.

r) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada ee aan caadi ahayn isagoo ka haysta oggolaansho qoraal ah Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

2) Marka uu ka maqan yahay Maareeyaha Guud shaqaalaha ama ay jiraan asbaabo ka reebaya shaqada, waxaa hawsha sii fulin doona sarkaal ka tirsan waaxyaha Wasaaradda isagoo ka haysta oggolaansho Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

Qod. 8aad

Xaquuqda qaynuuniga iyo dhaqaalaha ee shaqaalaha Warshadda.

Xaquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud Agaasimayaasha, waax yaha iyo shaqaalaha kale ee Warshadda, waxaa xukumi doona xeerka lambarkiisu yahay 36 ee 22 Abriil 1972 kuna saabsan shaqaalaha Warshadaha iyo Wakaaladaha Madaxa bannaan.

Qod. 9aad

Magacaabidda Agaasimayaasha

1) Warshaddu waxay lahaan doontaa Agaasimayaal waaxyood oo lagu magacaabi doono xeerka Madaxweynaha JDS isagoo tixgelinaya ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

2) Maamulayaasha xubnaha iyo laamaha waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu sasiixo Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

## QAYBTA 3AAD

## QODOBKA 10AAD

### HANTIDA WARSHADDU WAXAY KA KOOBAN TAHAY

1) Lacag dhan Sh. So 12.000.000 oo ah hanti gelinta qalabka iyo Dhismaha Dowladda Soomaalida iyo Dowladda Jarmalka Bari geliyeen Warshadda.

2) Wixii Warshadda ka soo gala faa'iido ay lıesho ama wixii shaqo ah ee ay u qabato hay'adaha kale.

3) Wax alaale wixii dambe ee Dawladda ama Hay'adaha Caalamiga si sharci ah ugu soo wareejiyaan Warshad da.

## QODOBKA 11AAD

### MIISAANIYADDA WARSHADDA

1) Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horeysa sannad kasta waa inuu isku dubaridaa miisaaniyadda caadiga ah iyo tan hormarinta ee ku saabsan sannadka soo socda isagoo faahfaahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Warshadda sannadka soo socda, waxaanu hor dhigi doonaa si loo ogolaado Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo kan Maaliyadda.

2) Sannadka lacagta ee Warshaddu wuxuu bilaabanayaa 1da Jannaayo wuxuuna dhammaanayaa 31 Disember ee sannad walba.

## QODOBKA 12AAD

### XIRITAANKA MIISAANIYADDA

1) Maareeyaha Guud marka ay tahay 3, Maarso ama inta ka horeysa sannad kasta waa inuu isku dubaridaa xiritaanka miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay

isagoo isku hagaajinaya xisaabtii sanadkaas iyo bandhiggii macaashka iyo khasaaraha Warshadda taana u gudbiyaa Wasaaradda Maaliyadda iyo tan Warshadaha.

2) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda wuxuu awood uleeyahay isagoo la tashnay Wasiirka Wasaaradda Warshadaha inuu oggolaado xiritaanka miisaaniyadda, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro faafinta Rasmiga ah ee Dowladda iyadoo kharajka ay bixineyso Warshaddu :-

## QODOBKA 13AAD

## AMAAH

Warshaddu, iyadoo haysata oggolaansha Wasiirka wax waa ka amaahan kartaa hay'adaha Caalamga ah iyo Bangiyadda gudaha ee Dalka si ay u hirgeliso xilka la saaray ama ujeedooyinka Warshadda :

## QODOBKA 14AAD

## FAA'IIDO WARSHADDA IYO KORDHINTA TACAB SOO SAARKA

Warshadda haddii ay soo saarto faa'iido weyn ee ka badaan tii loogu tala galay, iyadoo la raacayo qorshaha tacabka kordhay, waxay xaq u yeelanayaan abaalgud lacageed, sida uu qorayo qodobka 8aad ee toosintii sharciga lambarkiisu yahay 96 ee soo baxay 22 Abriil 1972.

## QODOBKA 15AAD

## XISAABAADKA

Xisaabaadka Warshaddu waxaa loo raacayaa habka loo dejiyey xisaabaha Wakaaladaha iyo Warshadaha :

## QODOBKA 16AAD

## MAAMULKA LACAGTA

Maamulka lacagta eeWarshadda waxaa xukumaya xeerka lambarkiisu yahay 58 ee soo baxay 31 Luuliyo 1972 Wakaaladaha Madaxbannaan.

## QODOBKA 17AAD

## SHAQAALE

1) Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee xeerka shaqaalaha Dowladda maareeyaha Guud, Agaasimaha Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Warshadda ma geli karaan ganacsi amase farsamo lid ku ah danaha iyo ujeedooyinka Warshadda.

2) Warshaddu way qoran kartaa shaqaalaha ay u baahan tahay iyadoo raacaysa sharci shaqo qorista ee Wakaaladaha.

## QODOBKA 18AAD

## XEER GUUD

Madaxweynaha J. D. S. wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelnaayo talada Wasiirka Wasaaradda Warshadaha, inuu soo saaro xeer nidaamiya Warshadda xukuma si looga hortago dhibaatooyinka ka imaan karta wixii aan ku sheegnayn sharcigan.

## QODOBKA 19AAD

Sharcigaani wuxuu shaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha J. D. S., waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdish 17 FEB 1980.

**MADAXWEYNAHA JDS**
Jaalle Maxamed Siyaad Barre